




Golaha Qaranka ee Wales

Tusiye haaga Golaha



Wixii akhbaar dheeraad ah la xariir:

Qadka akhbaaraadka: 029 2089 8200

Qadka boos celiska: 029 2089 8477

Tetelfoonka qoraalka ah: 029 2089 8261

Buuggan yar ee akhbaaraadka waxaa xattaa lagu helayaa codsi ahaan qaababkan soo socda:

Daabacaad wayn • Farta indhoolayaasha • Jiiro digsi (CD) • Luuqadda Calaamadaha ee Britishka (BSL)

Waxaaa kale oo looga helayaa elegtaroonig ahaan halkan www.wales.gov.uk luuqadaha soo socdo:

Bengaali • Bortuqiis • Carabi • Dutch • English • Faarsi • Faransiis • German • Gujarati • Hindi • Italiyaan • Japanese • Kantonese • Sawaaxili • Soomaali • Spanish • Urdu • Welsh

Tarjumaad telefoon ahaan ah ayaa lagu helayaa ilaa 60 luuqadood ee dadka luuqadooda koowaad aanay ahayn English ama Welish. Si aad u hesho adeeggan, wac 029 2089 8200 oo sheeg luuqada aad doorbidayso. Xiriiriyaha ayaa markaa ka dib kugu xiraya tarjumaha.

E-mail (guud): assembly.info@wales.gsi.gov.uk

E-mail (boos celis): assembly.booking@wales.gsi.gov.uk

Public Information and Education Service

National Assembly for Wales

Cardiff CF99 1NA

Wixii akhbaaraadkii ugu dambeeyay ah booqo shabakadda internetka Golaha **www.wales.gov.uk**

Uga daawo Golaha si toos ah ama mubaasharo ah kombiyuutarkaaga gaarka ah halkan **www.webcasting.wales.gov.uk**

Tusmo

Assalka Golaha	4
Golaha	4
Mustaqbalka Golaha	4
The Senedd [Seneddka]	5
Sida Golaha loo doorto	6
Deegaanada iyo Gobolada Doorashada	7
Kuweebay kala yihiin dadka Golaha ku jiro	8
Sarkaalka Guddoonka	8
First Minister [Wasiirka Koowad] ee Wales iyo Golaha Dowladda Welishka	8
Kulamada	9
The Siambr [Aqalka]	10
Doorka Guddiga Golaha	10
Guddiga Qiimaynta	10
Guddiga Joogtada ah	11
Guddiga Ganacsiga	11
Guddiga Aqalka	11
Guddi Goboleedka	11
Guddiga Dheeraadka ah	11
La shaqaynta Aqalka Commonska Guddiga Arimaha Welishka	11
Sida loo heli karo Golaha	12
Kulamada iyo Guddiyada	12
Soo deynta Kulamada Golaha	12
Meelaha la booqdo iyo Xarumaha Bandhigyada	12
Golaha Gobolka gudahiisa	12



Assalka Golaha

Bishii juulaay dhexdeeda 1997, dowlada Boqortooyada Ingiriiska waxay daabacday warqad cad, warbixin dowladeed oo bixinayso qorshayaal, loogu yeeray *A Voice for Wales [Codka Wales]*, taasoo muujiso qorshaha mas'uuliyad qaybinta gudaha Wales. Qorsheyaashan waxaa la gudbiyay codbixintii 18'kii sibteembar 1997. Baarlamaanka ayaa isla markiiba ogolaaday Government of Wales Act 1998 [Sharciga dowlada Wales 1998], taasoo aasaastay Golaha Qaranka ee Wales.

National Assembly for Wales (Transfer of Functions) Order 1999 [Golaha Qaranka ee Wales (Wareejinta qaabhowleedka) amarka ah 1999 wuxuu ogolaadaa wareejinta awoodda mas'uuliyadaha laga wareejinayo wasiirudowlaha Wales laguna wareejinayo Golaha taariikhdu markay ahayd 1'dii julaay 1999. Sidoo kale, qodob badan oo baarlamaanka ayaa waxay siiyeen awoodo cusub Golaha.

Golaha

Goluhu wuxuu u go'aamiyaa siday u kala mudan yihiin wuxuuna qoondeeyaa dhaqaalaha laga helo kaydka dowladda Boqortooyada Ingiriiska (ama Wasaaradda Maaliyadda). Awoodda ay qaybtooda ka qaataan gudaheeda, Goluhu waxay diyaariyaan qorshe waxayna ansaxiyaan sharci ka tarjumahaya baahida dadka reer Wale. Go'aamada arimahan waxaa sameeyo kuwa ay dadku ugu codeeyeen xafiiska gobolka Wales. Wales waxay ka mid tahay Boqortooyada Ingiriiska, oo wasiirudowlaha Wales iyo xubnaha Baarlamaanka (MPs) [xunaha Baarlamaanka] ka imaanayo deegaamada doorashada Wales waxay weli kuraas ku leeyihiin Westminster. Sharciyada uu ansaxiyo Baarlamaanka Westminster ayaa weli lagu dabaqaa Wales.

Samaynta sharci hoosaadka, taasoo faahfaahiso sida sharuudaha sharciga Baarlamaanka u dhaqan gelayo, ayaa ah howsha dhexe ee Golaha. Sharciga sare ee ay gaaraan Westminster Parliament [Baarlamaanka Westminster] ayaa dejiyo awoodda Golaha si ay u sameeyaan sharci hoosaadyo. Tan macnaheedu waxaa weeye in sharciga Baarlamaanka uu yeelan kara saameyn kale gudaha Wales marka loo eego gudaha England. Tusaale ahaan, taariikhdu markay ahayd 1'dii October 2004 Goluhu wuxuu dejiyay sicirkiisa u gaarka ah ee daawo qorista qarashkeeda gudaha Wales, taas oo ka duwan qarashka loo adeegsado gudaha England.

Mustaqbalka Golaha

Wagtigan xaadirka ah Golaha Qaranku waxuu leeyahay oo kali ah awood xaddidan oo muuqaalkiisa waa mid aan caadi ahayn marka loo eego kan dowladiisa (maamulka fulinta) iyo Baarlamaanka (sharci dejinta) waxay u kulansan yihiin sida urur⁽¹⁾ oo cinwaankooda guud yahay 'The National Assembly for Wales' ['Golaha Qaranka ee Wales']. Inta badan ururada Baarlamaanka, oo ay ku jiraan Westminster iyo Scottishka Baarlamaankooda, maamulka fulinta iyo kan sharci dejinta waa kala gaar.

17 Juulaay 2005, Wasiirudowlaha Wales, Rt Hon Peter Hain MP, wuxuu soo saaray warbixin uu ugu yeeray 'Better Governance for Wales' ['xukunka wanaagsan ee Wales']. Warbixintani waxay dhigaysay talo soo jeedinta dowlada ee sharciyada si looga bedelo qodob badan hadda dowlada Wales sharciyadeeda ah seddax arimood:

- in la abuurto qaab dhismeed cusub ee hogaanka sare ee fulinta;
- in la horuumariyo Golaha sharciyada awoodiisa; iyo
- in la casriyeeyo qaabka doorashada.

Tan macnaheedu waxaa weeye in Baarlamaanka iyo dowladda Golaha ay noqon doonaan kala gaar. Sharci dowladeed bedelaadda lagu samaynayo ayaa hadda baarlamaanka ka socdo waxaana la rejaynayaa inuu u dhaqan galo sharci ahaan aaqirka 2006. Iyadoo laga soo qaadayo in arintan loo ansaxiyo qaabkii



loo dalbaday, isbedelka Golaha wuxuu dhaqan geli doonaa doorashada xigta markay dhacdo ka dib taariikhdu markay tahay 3 May 2007.

Ilaa inta arintaas la gaarayo Goluhu wuxuu bilaabay inuu ka shaqeeyo isbedel ku samaynta sharciyada hadda jira gudahooda iyo, gaar ahaan, kala saarista maamulka fulinta iyo kan sharciyada ilaa inta uu karo. Tani waxay dadka u sahlayaa inay fahmaan doorka Golaha iyo kan dowladda, iyo xattaa in la kordhiyo mas'uuliyadda dimoqraadiyadda.

Akhbaaraadka ku saabsan warbixinta sharci dowladeedka waxaa laga heli karaa Wales Office [Xafiiska Wales] shabakadooda internetka **www.walesoffice.gov.uk**

(1) Urur = Golaha Qaranka ee Wales (60 ka ah xubnaha Golaha ee loo soo doortay Golaha Qaranka ee doorashada Wales afar sano kasta) iyo dowladda Golaha Welshka (xubnaha Golaha ee laga soo xushay ururka/ururada) ayuu ka kooban yahay ururka loo yaqaan 'Golaha Qaranka ee Wales'.

The Senedd [Seneddka]

Golaha Qaranka ee Wales' dhismaha cusub, Senedd [Seneddka], wuxuu ku yaalaa meesha caanka ah ee biyaha hortooda ah ee gudaha Cardiff Bay. Waa guri bartilmaameed gaar ah leh, oo uu naqshadeeyay Richard Rogers Partnership si uu u muujiyo aragtida Golaha Qaranka ee furfurnanta iyo gudbinta.

Dhismaha waxaa loo naqshadeeyay inuu gaaro heersare oo ah howl qabadka dabiiciga ah. Isticmaalka tamarta iyo qashinka waala yareeyay iyadoo la isticmaalayo tignoolajiyada la cusboonaysiiyo. Naqshaddu waxay ka koobtan tahay alaabo hore.



Sida Golaha loo doorto

Waxaa jira 60 Xubnaha Golaha ah (AMs). Doorashada waxaa la qabtaa afartii sanoba mar codbixiyaashuna waxay leeyihiin laba cod.


60 kaa xubnood, 40 waxay metelaan deegaanada waxaana loo doortaa 'first past the post' [kan ugu codka badan] qaabka ah, qaabka xubnaha baarlamaanka loogu doorto Aqalka Hoose.

20 xubnood oo kale oo metela gobolada la midka ah deegaanada Baarlamaanka Yurubta. Xubnaha gobolada waxaa loo doortaa qaab ah metelaad isku dhiganta oo loo yaqaan Additional Member System [Qaabka Xubnaha Saa'idka ah]. Qaabkani wuxuu u socdaa iyadoo la ilaalinayo caddadka guud ee kuraasta uu xisbi kastaa helo inay tusayso qaybta codadka ee uu xisbigaasi helay.

Gobolkasto ee doorasho wuxuu daboolayaa inta u dhexayso 7 ilaa 9 deegaan. Waxaa jiro 4 Xubno goboleedka Golaha ee loo doorto midkasto oo ka mid ah 5 ta gobol.

5 tan gobolada doorashada waa:

- Waqooyiga Wales;
- Galbeedka iyo Bartamaha Wales;
- Koofurt Bari Wales;
- Koofurta Galbeed Wales;
- Koofur dhexe Wales.



———— Xaduudaha Golaha Deegaanka

———— Xaduud Goboleedka Golaha Doorashooyinka

Deegaanada iyo Gobolada Doorashada





Kuweebay kala yihiin dadka Goalaha ku jiro

Sarkaalka Guddoonka

Sarkaalka Guddoonka waxaa doorto dhammaan xubnaha Golaha. Halkii mar ee la doorto, Sarkaalka Guddoonka wuxuu ugu adeegaa Golaha si dhexdhexaadnimo ah. Deputy Presiding Officer [Ku xigeenka Sarkaalka Guddoonka] waxaa loo doortaa sidoo kale.

Sarkaalka Guddoonka doorkiisa ugu wayni waxaa weeye inuu shir guddoomiyo kulanka guud, ilaalinta kala dambaynta iyo dhowrista xuquuqda xubnaha Golaha. Sarkaalka Guddoonka isagaa mas'uul ka ah in howsha lagu wado si ku salaysan sinnaan iyo eex la'aan. Sarkaalka Guddoonka isagaa mas'uul ka ah Standing Orders [Amarada taagan]⁽²⁾ isaga ayaana ah awooda ugu dambaysa ee dabaqaaddooda ama sharaxaaddooda.

Sarkaalka Guddoonka waxaa kale oo uu shir guddoomiyaa kulamada guddiyada shirguddoomiyayaasha, halkaas oo nidaamyada guddiga iyo howlaha quseeyo shaqada guddiga loogala hadlayo Shirguddoonada Guddi kasto.

Ku Xigeenka Sarkaalka Guddoonka wuxuu wakiil u noqdaa haddii loo baahdo Sarkaalka Guddoonka waana shirguddoonka Guddiga Aqalka.

First Minister [Wasiirka Koowad] ee Wales iyo Golaha Dowladda Welshka

60 ka xubnaha Golaha ah waxay u gudbiyaan awoodooda fulinta, oo ay ku jirto dhaqan gelinta siyaasadda iyo sharciyada, wasiirka koowaad ee Wales, kaasoo ay doortaan dhamaan Golaha oo sidaasi darteed inta badan ah hogaamiyaha xisbiga ama xisbiyada siyaasadda ee ugu balaaran. Wasiirka koowaad isagana markiisa wuxuu u gudbiyaa mas'uuliyadda gudbinta howlaha sare ee fulinta wasiirka Golaha Dowlada ee welishka, kuwaas oo wadajir u sameeyo wasiirada.

Wasiiradu waxay sameeyaan in badan oo ah go'aamo maalmeedka Golaha, wasiiradooduna waxay mas'uul ka yihiin arimahan soo socda ee mowduucyada meelaha kala duwan ah:

- Waxbarashada, Barashada waqtiga dheer iyo xirfadaha;
- Ganacsiga, Wax cusub soo saarka iyo Isku xirka;
- Deegaanka, Qorshaynta iyo Baadiyaha;
- Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada;
- Maaliyadda, Dowlada hoose iyo Adeegga Dadwaynaha;
- Dhaqanka, Luuqadda Welshka iyo Ciyaaraha; iyo
- Caddaalada Bulshada iyo dib u casriyaynta.

Cabinet [Wasiirada] waxaa la xisaabtamayo Golaha, kuwaas oo hubinayo go'aamada iyo ficiladooda.

(2) Amarka Taagan = Sharciyada uu Golaha Qaranka ee Wales ku shaqeyo.

Kulamada

Kulamadu waa isku imaanshaha dhammaan xubnaha Golaha kaas oo ka dhaco gudaha Siambur [Aqalka]. Waxaa weeye madasha Golaha ee lagu gaaro go'aamada sharciyadana lagu sameeyo. Kulamadu waxay u dhacaan maalinta Talaadada iyo Arbacada galabtii si caam ah waxaana looga soo daayaa si toos ah S4C 2 kanaalada teleefishinka.

Sarkaalka Guddoonka wuxuu daabacaa qorshaha kulan kasta mar hore. Howshana waxaa loo qabtaa sida ay uga muuqato qorshaha. Markasto oo uu Goluhu isugu yimaado kulan, ugu yaraan 45 daqiiqo waxaa loo qoondeeyaa su'aalaha afka laga waydiinayo Wasiirka Koowaad. Waxaa sii dheer, wasiirkasta wuu ka jawaabaa su'aalahaas afka ah ugu yaraan halmar afartii sitimaanba. Xubnaha Golaha waxay ka doodaan arimaha ku qoran qorshaha wayna u codeeyaan ra'yi yada miiska lasoo saaro.

Iyadoo lahaysto ogolaanshaha Sarkaalka Guddoonka, xubin ka tirsan Golaha wuxuu soo jeedin karaa in Goluhu si dhaqso leh u tixgeliyo arin degdeg ah oo leh muhiimad guud. Xubinta Golaha waxaa kale oo uu soo jeedin karaa mowduuc si kooban looga doodo ka hor inta uusan dhammaan kulanka.

Waqti ayaa loo qoondeeyaa inta lagu gudajiro wareegga kulan sanadeedka waxoogaa howlaha Golaha ah oo gaar ah, sida:

- qoondaynta miisaaniyadda Golaha;
- talooyinka lagu soo jeediyo magaca kooxaha siyaadda ee aan ku jirin Wasiirada Golaha;
- Warbixinta ay soo gudbiyaan kuwa raacsan iyo Guddiyo Goboleedka; iyo
- arimaha la xariiro Isutagga Yurubta.





The Siambr [Aqalka]

Xubinkasta ee Golaha waxay kursi loo goondeeyay ku leeyihiin Aqalka oo leh kumbiyuutar leh shaashad la taabto oo ay isticmaali karaan inta dooduhu socdaan. 'Chamberweb' nidaamka ah ayaa siiyo xubnaha Golaha helintaanka waraaqaha elegtaronikada ah iyo akhbaaraadka.

Goluhu wuxuu si buuxdo u yahay laba luuqadle oo xubnaha Golaha waxay ku hadlaan luuqadooda ay doorbidayaan, English ama Welish. Tarjumaad, Welish lagu tarjumo English, ayaa la helayaa dhammaan kulamada guud iyo kulamada guddiyada.

Xubnuhu waxay u codeeyaan iyagoo riixayo batoonka mashiinka meesha laga maamulo ee miiskooda. Waxay dooran karaan inay ku codeeyaan "Yes," ["Haa"] "No" ["Maya"] ama ay "Abstain" ["Ka aamusaan"]. Natiijada waxaa lagu soo bandhigaa shaashadda ku taalo gudaha Aqalka.

Rikoor xaraf xaraf ugu soo celinayo dhammaan kulamada ayaa lameeyaa kulan kasta, Guddiga qiimeynta iyo qaar ka mid ah Guddiga Joogtada ah, oo loo tafatiray si saxan, iskuna xigta si looga fogaado kusoo celin aan loo baahnayn. Tani waa ilo akhbaareed oo ay heli karaan dhammaan. Qoraal buuxo oo laba luuqadle ah ee kulamada ayaa lagu daabacaa shabakadda internetka ee Golaha 24 saac gudahood kulanka ka dib. Akhbaartaan waxaa xattaa lagu heli karaa codsi ahaan daabacaad weyn, luuqaadda indhoolayaasha iyo jiiro digsi (CD).

Si aad u eegto qaybta duuban ee kulamada, booqo shabakada internetka ee Golaha. www.wales.gov.uk/keypubrecordproceedings/index.htm

Doorka Guddiga Golaha

Guddiga Golaha waa koox xubnaha Golaha ah oo si joogto ah u kolmo si ay u dersaan siyaasadda iyo sharciyada. Guddiga badanaa waa mid 'ka dheeli tiran xisbiyada' kaasoo tusayo tirada xubnaha Golaha ee metelayo xisbi kasta Golaha gudihiisa. Inta badan Guddiyada waxay u kulmaan si caam ah. Guddiyada u kulmo qaas ahaan waa Guddiyada Howlqabadka iyo Guddiyada Aqalka. Guddiga aqalka wuxuu u kulmaa si caam ah sanadkiiba mar. Guddiga Heerka Dhaqanka laga yaabee inay go'aamiyaan inay u falanqeeyaa cabashooyinka si qaas ah. Guddiyada kale marmar ayay si qaas ah u kulmaan si ay u tixgeliyaan qorshayaal gaar ah.

Guddiga Qiimaynta

Guddiga Qiimaynta waxay caawiyaan in la horuumariyo siyaasadda, ka talo bixiyaan arimaha hoose, kuwa sare iyo sharciyada yurubta iyo inay la socdaan howsha wasiirada. Xubnaha Golaha ee ka kala yimid xisbiyada kala duwan waxay ka doodi karaan arimaha waxayna qaybsan karaan aragtida sida Goluhu u shaqeeyo. Guddi qiimayn kasta wuxu ka dhexmuuqdaa jagada wasiirka, kaasoo isagaba ah xubin ka mid ah Golaha.

Guddiga Qiimaynta ee Golaha waa:

- Waxbarashada, Waxbarashada waqtigeedu dheer yahay iyo Xirfadaha;
- Ganacsiga, Wax cusub soo saarka iyo Iskuxirka;
- Deegaanka, Qorshaynta iyo Baadiyaha;
- Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada;
- Dowlada hoose iyo Adeegga Shacabka;
- Dhaqanka, luuqadda Welishka iyo Ciyaaraha; iyo
- Caddaalada Bulshada iyo dib u Casriyeynta.

Guddiga Joogtada ah

Shanta Guddi ee Joogtada ah waa:

- Guddiga Xisaabaadka – kuwaas oo baaro si waxtar leh u isticmaalka dhaqaalaha Golaha;
- Guddiga Tayada Fursadaha – kuwaas oo baaro dhaqdhaqaaqyada Golaha si loo horuumariyo fursado simman;
- Guddiga Arimaha Dibadda ee Yurub – kuwaas oo diiradda saaro arimaha isutagga yurubta ee saamaynaya Wales iyo doorka balaaran ee ‘Wales dunida guudkeeda’;
- Guddiga Sharciyada – kuwaas oo derso sharciyada la horkeeno Golaha; iyo
- Guddiga Heerka Dhaqanka – kaas oo kor ka eego Golaha. Xubnaha Golaha heerkooda dhaqanka oo baaro cabashooyinka quseeyo eedaymaha jebinta xeerarka dhaqanka ama sharciyada.

Guddiga Ganacsiga

Guddiga Ganacsiga, oo ka kooban hal xubin Golaha ah oo ka imaanayo xisbi siyaasad kasta, waxay kala taliyaan wasiirka ganacsiga maamulidda howlaha Golaha; waxay kala taliyaan ku xigeenka Sarkaalka Guddoonka nidaamyada sharciyada hoose; waxayna tixgeliyaan howlaha guud iyo nidaamyada Golaha marka howlihiisu socdaan.

Guddiga Aqalka

Goluhu wuxuu awood fulin siiyay Guddiga Aqalka. Golahan waxaa shir gudoomiyo ku xigeenka Sarkaalka Guddoonka waxayna qabtaan arimaha la xariiro adeegga xubnaha Golaha. Tan waxaa ka mid ah:

- adeegyada, waxyaalah la helikaro iyo guriyeyn;
- Xubnaha Gunno maaliyadeedkooda; iyo
- arimaha la xariiro ee taageerayo howlaha Golaha.

Guddi Goboleedka

Waxaa jiro shan Guddi Goboleed. Deegaanada iyo Gobolada Xubnaha Golaha ayuu ka kooban yahay Guddi Goboleed kasto. Xubnaha Guddiga waxay dhegaystaan aragtida jaaliyadaha nawaaxiga si ay u hubiyaan in Goluhu metelo Wales oo dhan.

Guddiga Dheeraadka ah

Goluhu wuxuu go'aamin kara inuu abuurdo Guddi dheeraad, ku meel gaar ah si loo tixgeliyo arimo gaar ah oo uu Goluhu isku raacay. Tusaalayaasha waxaa ka mid Guddiga Sigaar ku cabista goobaha caamka ah iyo Guddiga Maalgelinta Dugsiyada.

La shaqaynta Aqalka Commonska Guddiga Arimaha Welishka

Amarada joogtada ah ee Aqalka Commonska ee gudaha London iyo Golaha Qaranka ee Wales gudaha Cardiff wuxuu ogolaanayaan wada shaqayn wadajir ah oo u dhexeyso Aqalka Commonska Guddiga Arimaha Welishka iyo qaar kale oo ah Guddiga Golaha.



Sida loo heli karo Golaha

Kulamada iyo Guddiyada

Xubnaha dad waynaha waxaa lagu soo dhawaynayaa inay xaadiraan kulamada iyo kulamada Guddiyada bulshada. Kulamada iyo inta badan Guddiyada Joogtada iyo kan Qiimaynta ayaa lagu qabtaa dhismaha Golaha Cardiff Bay [Gacanka Cardiff] waxaana lagusoo daabacaa akhbaaraadka shabakadda internetka ee Golaha. Guddi Goboleedka waxay si joogto ah ugu kulmaan gudaha jaaliyadda deegaanka Wales oo dhan akhbaartana waxaa lagu daabacaa joornaalada deegaanka iyo isgaarsiinta.

Soo deynta Kulamada Golaha

Dhammaan kulamada iyo qaar ka mid ah kulammada Guddiyada waxaa si toos ah looga soo daayaa teleefishinka dhijitalka ah kanalkiisa S4C 2. Toos iyo kulamo la duubay waxaa looga daawan karaa qaabka internetka halkan www.webcasting.wales.gov.uk

Meelaha la booqdo iyo Xarumaha Bandhigyada

Goluhu wuxuu leeyahay laba meelood oo la booqdo iyo Xarumo Bandhig. 'The Assembly at the Pierhead' wuxuu ku yaala daarta Pierhead ee gudaha Cardiff Bay iyo Xarunta la booqdo waqooyiga Wales oo ku taal gudaha Colwyn Bay.

Xarumaha waxay ka helaan soo booqdayaashu khibrad cajiib ah, taasoo loogu tala galay inay ka dhigto barashada Golaha mid xiiso leh oo laga feker. Bandhigga waxaa laga helaa akhbaar ku saabsan Golaha iyo doorkiisa iyo mas'uuliyadiisa Wales gudaheeda, waxayna ka helaan soo booqdayaasha fursad ay ku helaan akhbaaraadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan kuwa ay kala yihiin, maxaa ka dhacayo iyo sida uu goluhu u shaqeeyo. Labada xarunba waxay leeyihiin dukaamo gadayo alaabo Goluhu ku calaamadaysan yahay oo laga kala keenay Wales oo dhan. Soo booqdayaasha waxaa lagu soo dhawaynayaa inay yimaadaan Xarunta ama hore boos celi ugu sii samaystaan dalxiiska.

Golaha Gobolka gudihiisa

Golaha waxaa ka go'an inay gaaraan dadka Wales. Adeegga shaqaalaha ee Baarlamaanka Golaha ayaa saldhigoodu yahay gobolada si ay u horuumariyaan xiriirka ay la yeelanayaan deegaanka, jaaliyadda iyo kooxaha gobolada iyagoo xaadirayo dhacdooyinkooda iyo bandhigyadooda. Joogitaanka dhacdooyinka iyo goobaha shaqaaluhu waxay kari karaan inay dhiiri geliyaan shaqada Golaha oo ay la kulmaan dadka deegaanka oo ogaadaan aragtidooda.